OQSOONOW XUQUUQDAADA MARKA AAD LA KULANTO QOF BOOLISS

Si guud/*General*

- Marka uu kuu yimaado sarkaal is deji xitaa hadii ay dhacdo in xuquuqdaada lagu xad gudbo xasuusata in sarkaalku rabo in uu xaaladda gacanta ku dhigo.
- Haddauu arko in xaaladu aysan daganeyn waxaa macquul ah iyada/isaga ay arinkii u isticmaalan awood sidaas oo laga yaabo in aad ku dhaawacantid.
- Waxaad qorataa ama xasuusnaataa sarkaalka magaciisa iyo lambarka baajkiisa iyo lambarka gaariiga uu wato.
- Marnaba hataaban sarkaalka ama faraska uu wato waxaa laga yaabaa in lagugu xukumo in aad ku xadgudubtey.

Lakulanka wodooyinka/*Street Encounter*

- hadii askari boolis ahi ku istaajiyo oo uu doonayo in uu kula hadlo si wanaagsan ula hadal laakin usheeg in aad rabto inaad tagto. Ha uga jawaabin su'aaleha ah xageed jirtay xageed usocotaa IWM. Waxaad ku tiraahdaa miyaad dooneysaa inaad i xirto?" hadii uu kuyidhaa maya, iska soco
- lagaagama baahna inaad ID (aqoonsi tusto) in lagu xidhayo mooyee.hadii lagu waydiiyo magaca ama oqoonsiga waydii in lagu xidhayo iyo in kale. Hadii lagu yidhaa maya, iska soco adiga oon dhiibin magaca iyo agoonigaaga midna

Baadhitaan/*Searches*

- booliisku kuma baadhi karo adiga ama waxyaalahaaga hadii aan lagu xidheynin. Marnaba ha u ogolaan in lagu baadho hadaanan lagu xidhaaynin. Askari haduu ku waydiiyo inuu jirkaaga baadho uu dhusha kaa taabto waxay kadhigaatahay maxidhnid. Si xushmad leh ugu dheh ma ogoli baadhitaan. Ma ahan inaad Madaxa kaliya ruxdid.
- Ha'u faahifaahin waxa aadan u rabin in lagu baadho Waxaad tiraahdaa oo kaliya "marabo in la i baadho"
- Hadii askarigu bilaabo inuu kubaadho hadiidin waxa dhici karta in lagu xidho ama garaaco ama wax kasii daran kugu dhacaan.waxaa kaaga wanaagsan inaad maxkamadda kadoodo.
- Hadii lagu xidho, askartu waxay xaq uleeyihiin inay ku baadhaan ama jeebabkaaga dusha kataabtaan qalabkaagana waa labaadhi karaa. Waxyaalaha sharci darada ah uga soo tago gurigaaga.

Tarafikadu haday ku-jojiso/*Traffic Stops*

- Gacmahaaga hala arko hana dul saaraadaan steerinka hadaad soo bixinayos boorsada u sheeg markoa hore booliiska.
- Muraayadda gaadhiga daji 2-3 inji kaliya si aad ugala hadli karto waraaqahana uga dhiibi kartid gaadhiguna hakuu xidhnaado. Hadii lagugu amro inaad gaadhiga kasoo dagto furahaaga labax albaabada gaadhigina xidho.
- Waa in darawalka kaliya uu lahadlaa booliska dadka kale ee rakaabka ahi waa inay aamusnaadaan, oo ay fadhiyaan. Su'aal kasta uga jawaab su'aal. Sida "magaranaysa waxa lagua joojiyay?"maya, maxaa la'ii joojiyay?

Xiritaan/*Arrests*

- Hadii boolis uu adiga ama qof kale xidho daganaanshiyo muuji. Arintaasi nabdgalyadaada ayay ufiicantahay.
- Xaq aad leedahay ee ah inaad iska aamusto,Wayna kuu haboontahay sababtoo ah wixii aad ku hadasho oo dhan in laduubo oo lagugu eedeeyo ayaa dhici karta hadii su'aal lagu waydiiyo. U sheeg in aadan hadlaynin ilaa aad abuu kaate (Qareen) hesho. Xabsiga dhexdiisan hakula hadlin, maxaabiista kale ama sheqaalaha kagaabso.
- Xabisga hadii lagu geeyo waxuu boolisku xaq u leeyahay inuu kubaadho adiga iyo alaabtaadaba.
- Hadii lagu waydiiyo magacaaga iyo adresskaaga runta kasheeg. Waa dambi in booliska been loo sheego.
- Hadii ruux kale uu yahaq ruuxa laxidhayo hadhex galin dib isu taag oo ka qoro sar kaalka magaciisa, baaj number kiisa iyo gaadhiga number kiisa haday kuu suura gasho. Qoro magacyada iyo Telefoonada dadka markhaatiyada ah.

SIYAABAHA LOOLA TACAALO MEEL-KA DHACYADDA IYO DABIN–DAABYADDA BOOLISKA

1) Hadii ay dhacdo in lagu xiro. Waxaad is ku daydaa in aad is dajiso ha sameynin dhaq dhaqaaq deg deg ah, gadaalna ha u baxin. Haddadan markaa gacmaha ka xiranayn, Ku hay gacmahaaga meel laga arki karo kana fogeey jeebabkaaga kuna cel-celi “anigu ma diidani in la i xiro

2) Isku day inaad ogaato ama hesho magaca askariga ku xiray lambarkiisa iyo numberka baabuurkiisa. Haddii loo baahdo. Hadii ay dad kaa ag dhowyihiin ku qayli numberka baajkiisa si ay kuugu qoraan oo marqaati kuugu noqdaan. Haddii qof tikit lasiiyo ama la xiro, waxyaabaha aan kor ku soo sheegnay waxay ku qornaan doontaa ticket-ka ama qoraalka xariga

3) Qoro magacyadda marqaatiyaasha iyo lambarka telefoonadooda

4) Haddii dhaawac ku soo gaaro,markiiba gaar rugta caafimaad ee kugu dhow u sheeg gar-gaarahaaga in dhaawacyada ku soo gaaray ay sababeen booliiska si loogu qoro arinkaas diwaankaaga caafimaad. Ka qaado rugta caafimaad warqad ku saabasan diiwaandaada caafimaad marka aad tageyso

5) Si dhaqsiyo leh u sawir dhaawacyada ku soo gaaray adoo u isticmaalaya filim midabkiisu fiicanyahay. haddii gargaarhaaga caafimaad uu sawiray meesho dhaawacu kaa gaaray, koobi ka qaado haddii aysan ku siin karin waydiiso in lagugu sawiro kamiro adigaa aad leedaahay ood qaadaneysid

6) Isla markiiba intaad fariisato u qor si faahfaahsan dhacdadi aad soo martay wac oo weydii marqaatiyaashaadii iney sidoo kale yeelaan. Dabadeedna war bixin ka soo ururso marqaatiyasha

7) U tag oo soo arag abuu kaate (Qareen) inta aadan xaaladaada usoo bandhigin kooxda eegta dhibaatooyinka bulshada ee ka socota dowlada ee looyaqaan (Civilian Review Authority) ha u gudbin waxyaabaha cadaymaha ah sida canjalad laga duubay arinka dhacay ama war bixin marqaati uu kuu sameeyey.adiga oonan kala tashan abuu kaatahaaga.

8) Naga soo waca 612-874-7862 isla markaasba Si aad noola socodsiiso oon inaguna kaaga caawino. Sidoo kale waxaan kuu gudbinaynaa Abuu kaate (Qareen) oo kaa caawinaya si aad u hesho daryeelka caafimaad eed u badhan fahay



Arimahan waxaa kuu soo gudbiyay. **COMMUNITIES UNITED AGAINST POLICE BRUTALITY**. Waxaa kulanaa sabti kasto saacadu markay tahay 1:30pm (galabnimo) waxaana ku kulanaa walker church, 3104 16th avenue south Minneapolis waxii warbxin dheeraada ood u baahantahay oo ku saabsan xad gudubka booliiska waxaa soo waci kartaa wagti kasta oo aad ubaahantahay talefankana waa **612-874-7867** ama arag websiteka **www.CUAPB.org**

FADLANI ogsoonow in arimahan ay yiniin keliya in aad si guud ahaaneed u ogaatid waxyaalah laga rabo markay kugu dhacdo waxyaabaha aan kor kusoo sheegnay. Hadii aad qabtid su’aalo ama lagu xiro waa inaad raadsataa abuu kaate (Qareen) sharciyeysan.